17 - BIRAHA LA TUMO II

Axmed Nuur — Meeshi ayaanu ka sii wadaynaa, bal Aw Daahirow meeshii ka sii amba qaad, waad mahadsantahay.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid, waxaa birihii la tumayey, waa fara badan yihiin; waxayna noqotay inaan yaree aan halkan ka sheegi doonno inaan ayaan la taaban. Waanan hubaa in ay wax badani hareen. Waayo horay ayeynu u sheegnay in ay waxani wax badan iyo wax aynu ku soo dhaqmi jirnay iyo meeshii walba shaygii loo baahan yahay inuu ka shaqeeyay birteeda tumi jireen nimanka birta yaqaanna, waxaa la yiraahdo qabato ayaa jirta oo laba nooc ah, qabatadaasu waa bir dheriga lagaga soo saari jiray. Qabata kalena waa jirtaayoo waa qabatada carrabkiisa dabadiisa ay kaga shaqeeyaan nimanka dhakhtarrada ahi, oo ay soo suraan cadka ay goynayaan. Cagagida, xidid-dalqada, lagxada; xanuunada caynkaas oo kale ah; waa birta ay soo suraan oo nimanka iska dhakhtarrada ah ayaa gooya. Waa yahay, mid kale waa middi yar oo af badan, oo caaradda hore waxoogaa yar afo ku leh inteeda kalena mudac iska ahoo, waa birta ay wax ku gooyaan ee carrabka dabadiisa ay kaga shaqeeyaan.

Waa yahay. xogadahaa iyo hilib dalqahaa, iyo waxaa aan soo sheegay waa bir gaar u ah oo gooni ah, oo sida kuwa dowladaha horay u maray ay warshadahooda soo saartay, hadba wax lagu gooyo oo kale sideeda wax u goynaysay, oo ay u diyaar gareeyeen. Birtaa waxay samayn jireen, ama waabay karin jireenba, sida haddeerba isbitaaladu u kariyaan, ama wey gubi jireen iyada lafteeda inta aanay qofka waxba kaga goynin, yey gubi jireen, marka waxay garanayeen, in jermis wax la yiraahdaa oo hadeer la isku waafaqsan yahay in ay jireen ayaa halkaasu ku tusaysaa, waa yahay. Waxaa jirta bir kale oo la yiraahdo, nin la sheegay iyo in kale aanan hubin oo la yiraahdo “xaleefsato” oo wixii la qoro oo dhan; haruub qoriga, dhiil qoriga, iyo haruubka iyo dhakalka geela lagu maalayey, mooyaha, waxyaalaha caynkaas oo kale ah hoosta lagaga qoro. Waa bir iyana caynkaas oo kale ahoo soo qoolaaban oo la yiraahdo xaleefsato. Waa yahay, waxaa kale oo jira bir kale oo aan afba lahayn oo sidii mindiyada oo kale u yaree samaysan oo wixii muusa ah ee saan ah ee ay ma aragtay nimankaasu gal ka dhigayaan ay ku qurxiyaanoo, xaradhaa la yiraahdaa, oo iyana ay ku diillimeeyaanoo dabadeedna ka dambow aan weligeedna ka baaba’aynin, ee quruxdii ay iska lahaanayso. Waxaa jirta mid kaloo iyana la yiraahdo gundhi oo ah middaa yar oo saanta, xagga shishe intuu uga duso, haddana duntii isagoo qoolaaban, sida lagu santaaleeyo oo dibadda u soo saara oo si kale hoosta laga surayo oo la’aantiis aan waxbaba aan surnayn aan waxbaba socdeen. Gundhi baa la yiraahdaa magaalada iyo miyigaba isagaa aad uga shaqeeya, wixii sanca ah, waa mowjuud, waa yahay. Waxaa jirta mindi la yiraahdo kabo tolliin oo ninka kaba tollaa uu gaar u leeyahayoo aan hilibkana lagu cunin, xoolaha laguma gowraco, waxaasoo dhan wey ku afbeelaysaa, waa ka mamnuuc saantaa waxan ahayn in la taabsiiya, kolkaas intuu lisin

mariyo lo’na mariyo, kabtii dabadeed saantii sidaa ku oranayaa mise hawl dibadday ku tuuraysaa sidaa aawadeed baa hilibka oo dhan looga fogeeyaa, waa yahay. Kaba tolliin baa taana la yiraahdaa. Mindi kalena waxaa la yiraahdaa “Ari-qor” waa taa markii ay arigu soo ragaado hooyadu kaga bixisaa qodaxda amase meesha sabarka hore neefku uu ka dhitinayo ee qodaxdu ay ka mudday ee sidii maygaag noqotay, xol-col baa la yiraahdaayoo intay qoddo oo ciddada dheer ka goyso oo nabarkii banayso oo malax iyo wax ka soo dayso oo haddii ay qodaxdi ku jirto soo raaciso dabadeed markaasaa neefkii markiiba xanuunkii deynayaayo, halkaasaa addimadii uu iska dhaqaaqayaa waa tahay. Waxaynaan sheegin kii uguba xoog badnaa ee la oran jiray bilaawe, war bilaawihii mee? Geedka birta ah ee aynu ku manaafacaadno ee cadowga kula dagaallano ugu xoogga badan waxaa weeye; waran iyo bilaawe, bilaawaha imminka soomaalidu xoog iyo xoog ayuu ku leeyhay oo wuxuu ku sii dhaqan yahay wax allaale wixii galbeed inaga sii xiga amase dhulka uu cadowgu haysto, amase dhulka la yiraahdo Jabuuti, reer miyigoodu hub kale ma wataane bilaawe iyo warmo ayey iyagu sitaan. Dabkun kuma badna, kaasina birta la tumo ayuu ka mid yahay, warmuhu iyagu waa warmo laakiin kala jaadkoodu xaddi ma leh, qolo walibana kay tumato ayey magac gaar ah ula baxdaa, aahey! Waxaa uun jira oo hadeertan aan lagu isticmaalayn dhegleydii tii labada dhegood lahayd ee labada dhegood dib u jeedeen iyo tii afarta dhegood lahayd, ee labada gooni isu weydarsanayd ee wixii ay ku dhacaan aan laga soo saari karaynin, kuwii caynkaas ahaa colaadihii horey raaceenoo, intii dabku soo baxayba, waa sii maqnaayeenoo muddo dhowr ah anba waan hubaa dhegaleydii, waxaa isaguna tegay waran dheer oo sidaa afkiisu u dhuuban yahay oo birtiisuna sii dheertahay oo la oran jiray “juube” oo laga yaabo miyuusamka in laga helo, imminka calaamaddiisa, haddeerse waa dhaqan guuray oo ma jiro warmihii caynkaas ahaa ee kala jaadka ahaa meel walbana magaca gaarka ah looga yiqiinay ee faraha badnaa halkaa uun baa looga tagayaa, laakiinse kuwaa aan ogahay haddeertan inay soomaalidu ka dhaqan gureen kuwaas baa ka mid ah hadda anigu bal midhadhka aan kordhin lahaa Caliyow kuwa kale oo yaalla oo waran la yiraahdo “marda” horaan u sheegayoo waa waran weyn, haa! Waran weynaa wax kala gooyn war warkeygaan ka qaataa, buu yiri ninkii heesay, haa! Mid kalena war war baa la yiraahdaayo wuu ka hooseeyaa, waa labo. Labadii dhegaley iyaga waa sheegay, horta waan sheegayoo hooto baal-xaaf ah, waan sheegay waran kale waa jiraayoo isagana baal xaaf baa la yiraahdaa oo Sayid Maxamed baaba yiri: “baal-xaafka waxaa loo sitaa baylah kaa maqane, ninkii loo bukaan qabay hadduu bayda kari waayo birtiisa ka jabtee inaan la rabin ba’ay yaa u sheega”. Gabaygii halkaa kaga jirtay kaasina waa baalxaar. Eebo waa hooso yaroo, nin dhallinyaro ahi halkani dhaafayoo, oo muxuu sitay, eebo yar buu sitay, waa hooso iyaduna haahey. Markaas waxaa kaloo jira Murjina amase Saraawil, kaasi isaguna waa warankii weynaa ee barbarka ahaa buu la mid yahay magacaa kala bedelan, marjinka iyo taraawilka, waxaa aad markaa Laasqoray iyo dhulka

gaadho, murjin iyagu ma yaqaaniin ee waxay yaqaaniin Taraawil; murjin iyo taraawil waa isku mid, markaas maarta la qori gaadho waxaa jira nin taraawilka ama murjinka qofba magac uu yaqaano oo rag ahi ma jiraan, waa magaalo ee lama ogola hubka inaad qaadatid, murjinkan iyo waxanna waxay yiraahdaan dhulkaa xeebta ah Jin iyo waxaaba ka soo baxa oo dir ahaan baa loo qaataa oo waa faa'iido ahaan iyo taraawilkaa ayey sitaan, ninka aan saacad sidani, bahal yaroo garaangar ah oo maar ah oo iyana bir ah kuwaa qaata oo la yiraahdo baraarug. Hooyooyinkuna carruurta wey u xiraan waad aragteen haa! Oo jinkay ka dawo tahay, bey yiraahdaan oo wax masqarah ma aha, hooyooyinku cilmigoodi waa saani weeye een baraarugtana waad aragteen ogow; oo haddaan lama socdo, kuwaasina saasay ahaayeen, mid kale oo noocyo kale u samysanoo meesha nugaasha lagu qaato oo wad isaaq la yiraahdo waa jiraa oo isagana dhexda u buuranoo garba weynoo halka qamadka uu kaga jiro ma aragtay qanjir weynka ahoo adag oo balaayo ah wad isaaq bey yiraahdaanoo kaasina waa jiraa, waxyaalaha soomaalidu ay waranka ka dhigataa waa ay tira badan yihiin. Inta aan anigu ka xasuusnahayna waa intaa aan sheegay, haa!

Warantiiryeed waratiiryeedkaasu nimankii la oran jiray Tiirri ee ina horreysay, waa haa! Waa waran warantiiryeedna waa waran tiir leh oo waan dhaafayoo wuu yaallaa, imminkana waa la helayaa, waana kuwa ugu badan, dhexdhexaaduu wuxuu ku leeyahay aroor labada barbar ah, markaa laxaad buu leeyahay, kolkaa haddii waran tiirleh aad maqasho weligii ma laabmayo, aahey marka dabadeed halkaa waxaad ka garanaysaa intaa yar bal inaan hadda Caliyow ka yara taabtay adiga iyo Sheekh Abuu, bal waan idiin soo wareejinayaaye idinka lee waaye!

Cali Mudiir

Een waxaad mooddaa in weli hadallo laguugu soo celin doonno ay ka mid yihiin Qandi iyo guus! Marshi, har, qoos, iyo garqaale, magacyo caynkaas ah qooshi magacyadaas oo qalabka beeraha loogu adeego ah, alaabtaas waa laguugu soo celin doonnaa, weli waxaad laga hadlin seef. Bal hadda Abuuwow seefta iyo nocyadeeda ayaad ka hadlaysaa iyo beeraha iyo wax alla wixii aad xasuusato; waad mahadsantahay.

Sheekh Abuu

Caliyow waad mahadsantahay. (Bismillahi Raxmaani Raxiimi), waa intaa .. odi Daahir baa soo bilaabay, Saalaad baa ku xigay, haddana Dhegaweyne, Cali baa ku soo hadlay; Aw Daahir baa haddana u noqotay, bal hadda anay i joogtaa Caliyow ii soo dhiibtay. Waxaa hadda aan ku tataabanaa, qalabka biraha sidii loogu isticmaalayo oo dhinaca beeraha, ee mise si kale loogu isticmaalayo, col guuridda, kuwaanaan wax ka taataabanaa, horta farsamo yaqaanka oo biraha sameeya dadka farsamayaqaanka oo soomalida aad u liidaan oo yiraahdaan waa tumaal yacni, tumidda birtaa lagu magacaabaa, dadna waa xumaayaan, waana fiican yahay, dadka biraha sameeya, maanta xoogaa aan kahadlayno waa bir samayska, farsamada iyo tumaalka. Marka haddii aan wax ka soo qaado oo ka soo bilaabo waramo, waa loo sheegay laakiin

anigana sibaan ku soo sheegayaa, waramaha waramo oo lagu duulo colaad oo si aad ah loo darbaday la balaariyo, marka geedahaasi waa la soocaa, geedahaas waxaa la yiraahdaa, geed la yiraahdo Eeri mise geedahaas la yiraahdo Luun oo dhaadheer ah oo kakan oo adeeg baa lagu daabaa, waramahaas ama mareer aad u kakan ama Mareer, waa la caddaynaa si aad baa loo xarxardheynaa, waa lagu shiraa, markay iid tahay oo sannad tahay, shirna waa loo qaataa, colaadna waa loo qaataa, yacni warmahaas saasaa loo diyaar garaynaa, warmahaas oo baballaaran oo yacni la xardhay saas bey yihiin, waxaa kale oo aan ku daraa, meesha waxaa jirta haddana dadka biraha sameeya waxay sameeyaan wax la yiraahdo oo “mataraash”, mataraashka ee waa la dhuubiyaa waranna ma aha ee waa la dhuubiyaa markii la dhuubiyo illaa adiga taako ka dheer baa la dhuubiyaa, marka isaguna geed baa lagu daabaa yacni ee ooddaan ama mareer adiga kaban waa la isagu daabaa, isaga waa laciif, laakiin mataraashka waxaa anfacaa beerahaa lagu dhowraa, beerahaa loo qaataa; kashiitaha, doofaarka, ee duwaha, dubcaddaha oo beeraha cuno habeen baa loo qaataa, mataraashka habeen baa beerta lagu dhowraa, beeraha loo qaataa, waxaa kuu soo haray eebo, yacni eebada waa la wada yaqaan, eebadaas dhuudhuuban waa iska bir kaligeed la sameeyay oo dadka farsamo yaqaanka sameeyaanoo oo biraa la iska dhuubinaa, eebadaas waxaa weeye dhallinyaradaa u badan mise qof weyn xataa waa iska qaadanaa, mar mar eebadaas waa la kilkilaa haddii wax kugu soo baxo kaa dheer yacni eebadaas waxaa la dhahaa, eebaa igu soo kilkilay, waxaa loo samaystaa in la tuuro oo la gemo oo wixii kaa dheer aad ku durtid, inaan marka la dhuubiyo afkeeda waa laga suumaa waa la soofeeyaa waa la diyaarinaa. Tan kale waxaa waaye, waa yaambo, .. farsamo yaqaanka oo biraha tumo yaambadaas waa sameeyaan, yaambadani si looga garaaco tii kale Aw Daahir baa soo maray, waxaan ka soo qabahaa isticmaalka; yaambada waxaa lagu isticmaalaa beeraha, beerta lagu falaa, een qodidna waa la yiraahdaa, falidna wa la yiraahdaa, beertaa lagu falaa yaambooyinka waa kala yihiin. Marka yaambo waaweyn oo la ballaariyay la diyaar gareeyay oo daab marer lagu daabay, daabkeeda hal dhudhun iyo wax la jira oo waa cabbir oo iska daab maaha, waa daabka wax loo soocaa niman yaqaaniin baa loo geystaa, birta qofka soo sameeya oo si aad ah u soo wanaajiya yaa yaambo fiican ii sameey ii tun baa la dhahaa, markii lagu soo qaato dadka loo geysto haddana dadka wax daabo geeda qorriddaa loo geystaa, waa laba shaqo waaye. Qool waxaa la yiraahdaa beerta ay bariso lama sano oo siku taallo oo wax ka baxeen oo la iska dhaafi la abuurinoo la tacbinoo, beertii marka sanadkaan la rabo in la tacbo yaambadaa loo soo qaadanaa waa loo soo diyaar garaysanaa yaambadaas waaweyn baa lagu fashaa, waxaa la yiraahdaa qool, mise beer weligeed la tacbin, waxaa la yiraahdaa qool aa lagu tacbaa yaabadaas waaweyn, qool! Dhul qool ah, oo cusub oo qool eh oo geeda waaweyna ku yaalliin oo lo’mareen biyo galeen iska ahaan jiray ayaa la yiraadaa qool oo kakan aad buu u kakan yahay, yaambadaas waaweyn yaa loo samaystaa oo iska

diyaar eh, yaambada kaleeto taas waa ka duwan tahay, kistoo waa ka yartahayoo beertaa lagu falaa oo falid loo qaadahaayaa. Waxaa kuu soo haray “misaar”, misaartana waa kala duwan tahay, misaar aaweynoo odayaasha diyaar garaysteeno oo waxaa loo diyaar garaystay geedo goys, beer hadda cusub oo geed goos eh, misaarteeda waa gaar, misaar waaweyn baadadkaas sameeyaan; nimanka birta tumaan misaartaas waaweyn baa loo dooraa, beerta waa beer hadda cusub oo geeda waaweyn ku yaallan ayaa loogu tala galaa “misaarta geed-qaadka” marka geed-qaadkaas waxaa iska leh misaaraha waaweyn. Misaaraha yaryar habraha aa duurka ula baxaan, qoryo yey ku soo guurtaan, misaartaas oo yaryar, iyo dadkii waa qorof geed, qorodyaalka misaaro yaryar ayey ku isticmaalaan.

Waxaa kuu soo hari seef. Seefta iyada xarragana waa loo qaataa, duullimaadna waa loo qaataa, seefaha waa kala yihiin; dadka birta tuma, seefana waa sameeyaan, seef oo jurmad leh oo dhaadheer waa tii colaadda duullimaadda loo samaystaa oo la diyaar garaysto waa jiraan oo meged wax la yiraahdo, ee kan wax la yiraahdo maqaarka la megdeeyo, mise la diyaar gareeyo aa loo samaystaa gal waa la iska diyaar garaystaa, ciribteeda gadaalna waxaa lagu geliyaa batay, bir xaar oo lagu sameeyaa, seefta waa la iska diyaar garaystaa taasoo ah duulimaad, seef xarrako galkeeda waxaa la geliyaa qalin, kulligeedaba, marka iyadana suun baa la gelinaa garabkaa la gashanaa, qalin waa lagu sameeyaa qalin oo xarrako galkeeda saas loogu shoobaayo qalina la gelinaa inta wa bir la sameeyi, galkeedu waa qalin. Galkeedana qalin waaye, kulligeedaba lagu gashiimanaa qalin waa lagu sameeyaa qalin oo galkeeda xarragi, seefta oo lagu shoobaayo qalinaa la gelinaa. Waxaa kuu soo hari ee bilaawe weyne, bilaawahaas oo Aw Daahir saas u soo mareen; waa jira bilaawahaas, aadbaa isagana loo sameeyaa wax tar weyn buu leeyahay. Bilaawaha waa kala baxaayaa, bilaawahaas weyn, mid lagu xarrakoodo iyo mid la xirto, yacni duulimaad iyo colaad loogu diyaar garoobo saasey u kala baxaayaa, midka lagu xarrakoodo oo lagu shoobo, waxaa la yiraahdaa “bilaawe-ilig” ilig baa lagu sameeyaa, ilig maroodi weyn iyo macdan birtaan oo khafiifta ah, birxaar la yiraahdaa lagu sameeyaa, qalinna koraa loogu samaynaa, iligna waa lagu samaynaa, waa lagu xarrakoodaa, bilaawahaas shoob, waxaa la leeyahay bilaawe ilik, ninkaas bilaawe iligga xiran qalinna ku googoosan yahay, ninkaas markaas laba go’ weyn garabka ku sito oo bilaawe ilig u xiran yahay ninkaas waa la amaanaa, laakiin bilaawahaas haddii neef kaa bakhtinaayo laguma qalo, bilaawe ilig daabkiis ka samaysan neef malagu qalo, aahay! Bilaawahaas shoob lee waaye, bilaawahaas dad magac leh baa qaataa, matalan garaadka iyo ugaaska iyo imaanka iyo ninka malaqa iyo yacnii ninka ma aragtay iska samaysta waa u banaan yahay, waa iska qaadan karaa, waxaa la leeyahay bilaawe ilig oo qalin ku googoosan. Waa qabi jiray aniga aabahay aan ka dhaxlay, bilaawe ilig baa la yiraahdaa, waa ku soo shoobi, qaansi weyntii iyo bilaawahaas waan ku soo shoobi, bilaawahaas yacni aad baa loogu shoobaa, bilaawahaas waa jiraa iyo bilaawahaan kale ee loo

samaysto een cadow loo smaysto oo loogu tala galay oo la xirahaayo, ragga oo dhan waa xirahaa bilaawahaas. Bilawahaas saas bay u kala baxaayaan, labadaas bilaawe. Waxaa kuu soo haray een mindiyaha, mindiyaha wey kala baxaan oo dhowr mindiyo ay u kala baxaan; mindi oo si mindi iska eh, oo habraha hilibka ku googoostaan, mindi kale oo gaar ah “mindi-guddooy” aa la yiraahdaa waa godantahay, gabdhahaa lagu gudaa. Mindi yar kale oo aan mindi guddoyna ahayn oo lagu soofeeyo “seyno” dhagixii fiicnaayoo aad u qurux badnaa lagu soo feynaa dhagaxaas iyo mindida waa isla socotaa, nimanka oo dadka gudaan oo wiilasha gudaan, dhagaxaas ma dhaafaan iyo mindidaas, midi si fiican loo samaystaa iyo dhagaxaas oo la yiraahdo sayni, aa lagu seeneeyaa, tan kale waxaa la yiraahdaa “qoramo” waxaa lagu qoraa geedaha dhiilaha iyo kurbunka xeeriyaasha, dhiilaha iyo mooyaha, waxaa lagu sameynaa oo lagu qoraa wixii godan geed baa loo soo goosanaa oo saan u godan oo u laaban oo haddana waxaa lagu suraa bir, birta oo afkeeda wax yar si u ballaaran, marka waxaa la yiraahdaa qoramo. Waxaa kuu soo haray Sooke bir la yiraahdo oo yaambi ka yar, khafiif ah, daabkeedana khafiif, waxaa la yiraahdaa “shooke”. Shookadaas baan qaate yacni, waxaan u qaatay meel yar oo saas ugu soo jarjari baan u qaatay, Marka een waxaa kuu soo haray, colaad haddii loo baxaayo gammuunaha la samaysto oo dadkaana sameeyaan, fallaaro gamuunta lagu suro iyo dabbaanno, waxaa lagu samaystaa gammuunta, dadka farsamo yaqaanka ah ayaa sameeya oo tumaasha ah, wax kasta oo wixii lagu shoobo oo lagu xarrakoodu ama cadow loogu duulo oo bir ah oo bir ku saabsan dadkanaa iska leh oo farsamo yaqaanka ah.

Yacni wixii oo wax lagu tolo, sida mudaca, waxaa la soo maray hortay oo Dhegaweyne uu hortay soo sheegay. Marka waa fara badan yihiin, beerta dibiga jiido, biraha lagu jiido, annagu ma naqaanno ee Aw Daahir baa soo sheegay, laakiin annaga yaambadaas iyo masaarta, yaambo weynta iyo yambadaas yar ee annaga birahaas iyo intaas iyo bilaaweyaashaan iyo mindiyadaan intaanaa ku dari, waana waxaa ugu dambeeynaa “muduc iyo mindiba meeshi mudan yihiin aa la marsiinaa”, yacni waxaa weeye dadkana waa taabanaysaa eraygaas yacni maahmaahaas. Yaambada haddii la falo beerta oo dhooqo gaarto, waxa lagu falo dhooqo waa bir ballaaran xereg yar lagu xero, moxogga yaa lagu xeraa, markii yaambada dhooqo gaarto, “hoolato” yaa la yiraahdaa, waa lagu hoolaa. Birta guriga iriddiisa la dhigo oo dhooqada la iskaga waxeeyo waxaa la yiraahdaa “birdarsaameed”, birta dersaanka la suro, ku soo tirtiro. Birta canjeerada lagu dubo iyo waxaasna waa isla mid, Laakiin birta canjeerada annagu canjeero maku dubi jirin laakiin soomaalida caan ahaan siday u badan tahay canjeerada wey dubataa, tan annaga waxaa lagu dubta hilibka haddii la rabo oo in la dubo, hilibka keligiis la rabo oo saliid lagu dhowraayo. Magaca tumaashu yacnii ma xuma. Marka biraha anoo la iga badiyo magacyaalkii hore, laakiin intii aan aqaan, waa intaa idiin sheegay, sida wax loo qoro, waa idiin sheegay, shookada waxaa lagu qoraa xataa waxaa la yiraahdaa albaabyaha iyo

kawaawaha beerta lagu kawaawiyo waa lagu qoraa, waxaas waxaa iska leh shooke, doomanka waxaa lagu qoraa shooke, shookada waa kala yihiin; shooka yar iyo shooke weyn doomanka lagu qoraa, marka tan kalena waa qoromo, wixii dheer weelka godan iyo qoromo ayaa lagu qoraa, marka saasey u kala badan yihiin ee wixii kale dadkii iga horreeyay iyagaa sheegay, marka waa iska fara badan yihiin. Waxaa jirta weliba waxaa nagu jirta dhinacaan webiga biro oo dadkaas noo sameeya maqaalin oo mallayga lagu gaato, yaxaasna lagu dabo waaweyn eh. Waxaan arkay weli dhurwaay, bir loo sameeyay waan arki jiray waagi hore oo uu ku dhacayo. Dadkaasaa sameeya farsamo yaqaanka ah. Marka haddii aan xasuusto ee tii farsamo yaqaanka oo taynana aan ahayn laakiin aan ku soo gaaray, wakhtigii oo fashiistaha aan soo gaarnay, aniga hadda haddii aan figrad ahaan, diseynayaan ku samayn karaa, mid dhurwaay ku dhacayo, haddii dadka loo geeyo oo sameeya la dhaho waa samayn karaan, marka aad iyo aad bay dadkaas birta tuma wax badan u sameeyaan, dhinac walba iyaga waa lagu faanaa, waa sheeko dheer; marka birta qaybteedii ee raggii horaa ka sheekeeyey. Hadda Aw Daahirow iyo Caliyow wixii aad i su'aashaan waa idiin sheegaa, marka intaanaan ku joojinaa ee wixii aan hilmaamana waa ku soo noqo doonaa ee Caliyow bal iga guddoon.

Cali Mudiir

Sheekh wuxuu taabtay arrin aanan taabanoo, qalabka si kale aan u taabannay, laakiin qalabka qaar "shoobid iyo qurux" keliyahu loo qaato maanan soo sheegin, haddaba dadku xataa waa yiraahdaan "aslaxtu siina", seefta oo qurux loo qaato, oon dagaal loo qaadanin, tilmaan gaar ah weeye, oo hadda dadka magaca iyo mudnaanta leh ay qaataan. Waxaa noo haray: Madanow maxaad tahay? Maxaase laguugu adeegsadaa, Qowley maxay tahay? Een erayadii kaleeto oo ahaa qotaha oo dadkaas Jigjiga intii loo gaaro beeraha ay ku adeegtaan.

Daahir Afqarshe

Barbarkanna bal waxaynu doonaynaa, bal waxaynu ka gaarno inaynu waxoogaa ku kordhino, waxaa jira qalabka beereedka intaynaan taaban geedkaan la yiraahdo bilaawaha; waxaa jira sida Sheekh Abuu u sheegay bilaawe fool-maroodi lagu qurxiyay, oo daabkiisii yahay, oo qurux badan, oo madaxda soomaalida qaadato, hilibkana laguma cuno, salaaddana laguma tukado sababta oo ah: dadkani waa dad diini ah, maroodiga kolka uu bakhtiyo foolkan laga jaray, waa bakhti, sidaa awgeed bey ku diidayaan, foolkaas bakhtiga laga gooyay inay wax ku cunaan, kuna tukadaan. Aniga waxa aan haystaa ul la'iiga soo dhiibay Keenya, oo sidaa xaradho u leh, madaxa iyo dhexdhexaadda iyo jiridda ay yihiin fool maroodi, intiiba waan ku saarayoo dabadeed lacag baan geliyay, waxaa la yiri adoo weysa qaba ama wesaysanayo hadaad taabto intii bakhtigu ku jiray, baa weysadaadii wax yeelaya, dabadeedna waa ka saaray, sidaa weeye horta sida Sheekh Abuu sheegay, soomaalidu ay xarago ugu qaadato, haddana sababta oo ay tahay, inaan waxaana lagu gawricin, waxna lagu cunin, waa fool maroodiga aawadii. nin madaxa ah un

baana sita waana lagu yaqaanaa, markow salaadda gelaayana waa iska bixiyaa, dhulkow dhigaa, kolkow salaadda tukadaa bow haddana gashadaa, caadadaas bow leeyhay, kaa intaas baan idiinka kordhiyay. Waayahay.

Seefta noocyadeedii sidaasoo kale meel bay ka soo wada baxaan, ableydan la wanaajiyay iyo sida loo qurxiyay foolka maroodiga iyo qaarna iyana saasaa qurux loogu qaataa, qaarna dagaal oo labadu waa kala nooc, markaasayna dabadeed galkaas dheer oo loo sameeyay ee xagga hore haddana ku leh ma aragtay maartaa gaduudan ee aan qayirmaynin, xagga dabena ku leh. Biraha waddankeennana wax la wada koobi karo maaha waa yahay. Bal haddaynu eegno tan tumaasha ahoo ee aan annagu samaysano, waxaa la yiraahdaa tumaal. Tan kale ee dibadda inoogu timaaddana waxaynu niraahnaa waa shub, marka midna wershad baa soo shubtay, midna waa wax nin garaacay oo iyadii u ekeysiiyay. Birta uu tumo ninka saanica ah; bir qabadka isagaa tunta, oo kumaynaan soo darin sheegiddii hore oo birtu ku qabanayo, waa yahay. Madanihii kala jaadjaadka ahaa ee aanu xoolaha ku suntanayna sooma aynaan qaadin. Madanaha qaar baa qoolaabanoo sidii yar oo kale ah oo meelaha loogaga dhigo oo la yiraahdo goobo, midbaa dhexda intuu sidaana uga wareegsan yahay, dhexdana diillin ku leh oo “H” baa la yiraahdaa rag baa geelana barbarka kaga dhigta, lo’ dana misigta, halakay u ballaarantahay oo wax ka qurux badan, oo weligoodba ku macaamilooda oo iyada oo sidii shaabbadda dowladda ay wax ku shaabadaysan jireen, madaxa ay ku lahayd magaranaysaa renjiga ee saa wax loogu joojinayey yaa birtii markay caddaato sidaas oo kale loogu joojinayaa, iyadoo xaruuftii xagga hore ku leh, markaasay ama soo baxaysaa ama “M”, ama waxay soo baxaysaa goobo, ama waxay soo baxaysaa “H”. Birta caynkaas oo kale ah ee madanaha ahna wey tumaan, ragga sanca yaqaanka ah ee soomaalida ah, waxay kaloo tumaan oo aan dhaaxba laga helinba, dibadaha meel laga iibsadaa aanay jirin, birta tan dhuudhuuban ee laga dhigo ganfada weyn leh ee masaabiirta waaweyn ah oo doonyaha lagu sameeyo oo looxii iyo jirriddii weynayde xagga shishe ku jirtay ee doonida gudaha looga soo gelinayey labada intay isaga dusto la soo qaloocinayey meel laga shubaaba imminka; iyo guriga albaabkiisa waxyaalihii caynkaas ooo kale ahaa, haa! Sidaas oo kale ayaa dabadeedna ay weligoodba u samayn jireen. Wax allaale wixii guryaha lagu samaynayo ee sidaas oo kale loo qooraabayana waa gaar, iyaga sameeya. Mar haddii ay bir arkaan mid haddee wershad soo saartay maahine oo iyaga aanay u taag helaynin sida: madaafiicda iyo waxyaalahaa waaweynba maahe, wixii ay arkaan waa sameeyaan. Banaadiiqda qudheeda qaar baa sameeya, oo waxay sameeyeen birtii ayay qaadeenoo waxay geliyeen bir kale oo ay sidaa ugu rakibeen oo mindhaa qorigan waa jeex jeex gudaha ah, waxaa uu ku samaynayaana rasaas. Hadduu iska siman yahay oo bir la shubay uu yahay waxba meel ma tageen, waxaan u malaynayaa dhuunta asliga ah iyagu ma qorinee ay dhuun helen ay tahay, laakiin kolkay qorigii heleen ay qorigii qori kale ku rakibeen, wax allaale iyo wixii

kale ee ay doonayeen oo dhanna u sameeyeen, een gudihiisaana jeexjeexii biro ay u haystaan oo yar yar ayey kolkaa dabadeedna jeexjeexiina ugu sameeyeen, ama hadduu gaboobaha ay midhidhka iyo waxaa intay kaga bi'iyaan ay jeexjeexahaan u sameeyaan. Nimanka sancadoodii waa lagu fajacay. Waxyaalo ay qariyaanoo meel gooni ah ay ku sameeyaanna oo ay u diidaan dadka inuu ogaadana waa ay badan yihiin. wixii ay arkaanba waa sameeyaan. Waxaa kale oo jira, haddeer waa idinka arkay inay jiingaddii laamiyeeriga ahayd ee aanu aqallada saareynay inay ka sameeyaan haamihii aynu biyaha ka cabbaynay oo ku dhaansanaynay oo haweenkii iska hawl yaryarsteen, dhibtii iyo baaldigii, iyo manjarafadii iyo maddaraqii iyo dheryihii waa weynaa, wax allaale iyo wixii oo dhan inay sameeyaan waa wada ogtihiin oo aad inaynu ugu ladnaanay, waxaas aad arkayso oo dhanna haddaynaan wershad lahayn ma aynaan noolaaneen. Nimankaa birta tuma siyaabaha aan anigu u leeyahay abaal weyn bey inoogu leeyihiin oo iyagaa ina soo gaarsiiyay, dadka inala soo simay, siyaabahaa weeye. Markaas biraha ay sameeyaanna wax la soo koobi karo maaha, wax badan oo aynu illow sanahay amase xusuusandoonno ayaa jira, wax kaloo intaa aan ku daro magaranayo. Samaradda dhulka lagu qodayo, laba gedhleyda beerta lagu qodaa , tan faraleyda la yiraahdo een wax lagu soo xaadho waa jirtaa oo haddeerba iyagu siday u sameeyaanba, aad iyo aad yey faa'iido weyn u leedahay, markaa dabadeed silsiladdii ay tumayeen ee ay uguba naafac badnayd tii awrta lagu seetaysnayey, tii miisaanka laga dhigayey tii gammaanka afka lagaga qabanayey ee xakamaha ahayd tii bahalka lagu dabayey, tii maxaabiista lagu xidhayey, waxyaabahaasuna waa ay farabadnaayeen. Bal hadda Salaad baan u wareejinayaa, Salaadow Jaalle bal waa ku kaa.

Salaad

Mahadsanid Daahirow. Horta birta marka hore waxna annagaa waxaysanna, waxna bannaankay noogaga yimaadaan, horta seefta sideeda wax yaryaroo hadda la bartay maahine annaga horta seefta banaankay nooga timaaddaa, marka laba magac baan u naqiinnoo, Carabi iyo Xabashi baanu u kala niqiin, tummaalladaynu ee raggaan soomaalida ah oo sancada yaqaan ma aynaan sameeyn jirin waagi hore, labadaasiba banaankay noogu imaan jireen. Marka biraha banaanka nagaga imaan jiray oo aan annagu ku isticmaali jirnay, waxaa ka mid ahaa, seefta waxaa ka mid ahaa geedkan muuska ahaa oo lagu xiirto, waxaa ka mid ahaa makiinadda yar oo lagu xiirto, waxaa ka mid ahaa maqaska lagu jarto, inta yar oo biraha yaryar oo aan ku isticmaali jirnay. Waxaa ka mid ahaa cirbadda, intaasaa horta ka mid ahaayoo, illaa al aanana si fiican uguma baaraan deginoo, ma samayn karo oo niman yar baa haddaba sameeya, ragga soomaalida oo sancadda yaqaanna, taasi waa biraha, marka waxaa jira wax yar oonaan maanta taaban oo anigu aan u ciil qabay. Birihii waan sheegay, waxaanan is warsan bal horta birtii, geedihii la gelinayey oo geedihii bir waliba ku jirtay sidii markii la qoro, birtii lagu qori lahaa, wixii lagu suubin lahaa, illaa geedkii oo faag faag ah lama qaadan karee, sidii sulub

looga dhigay, sidii oo loo wanaajiyay. Qoriga hadda dad tab buu helay, annagu kaas ma keensan oo waa xaashi bannaanka noogaga timid oo hadda lagu waxeeyo. Waxaa jirta bir aanan soo taabanin oo afkeedu sida yaambada kale ah oo fidsan oo haddii la doonana saraha iyo rinjiga ku qallala iyo laga bixiyo, Raashkeeti la yiraahdo, af ballaaran bey leedahay sidaasaa laga yiraahdaa oo geed waaweyn laga qoray yaa lagu simi jiray oo ayan geed dhuubanoo sidiisa u baxay ahayn, ama middaas sida xalleefasata oo kale, yaa ayadana sidaas oo kale lagu oran jiray, waana toosantahay afkeeduna waa rukun saas ahoo sinan weeye, marka saasaa lagu oran jiray, marka birtoo dhanna waxay ka dhigi jidhay sida meeshaas oo kale sidii mid xaashida lagu saray oo kale ay ka dhigi jidhay. Waa rushkeeto ayadana waa jidhay.

Waxaa jidhay mid aanan taabanin, mid intaan alaabtaan casriga aan la helin. Bir nimankaan soomaalida ah oo sancada yaqaan ay tumi jireen, waxaa lagu daban jiray mallayga, dhega yar bey leedahay, waa la soo qalloocinayaa sidii gadaalna waxay ku leedahay meel yar oo daloosha oo xarig lagaga xiro oo adag bey leedahay, hilib yar baa waxaa loogu xiri jiray mallayga, middaasna qolada barigaan aqaan “Qobatay” yiraadaa, jilid iyo maqaalinna waa la yiraahdaa. Waxaa jidha mid kale oo ka gedisan oo la yiraahdo “Lacaaf”, waa weyntahay, taasi Sheekh Abuu waa yaqaan, waa weyntahay oo hilib weyn baa loogu xiraa, waxay leedahay saddex iyo afar gannood oo laba dhegood mid waliba leedahay yaxaaska weyn, bahalka oo dhan bey ku dhegaysaa, asaga hilibkaan goosuu leeyahay markaasay ku dhegaysaa, markaasay kuligii lagu soo jiidayaa, waxaa suubiya tumaaladayada.

Marka soomaalidu nimankaasi nimanka soomaalida ugu wax aqoon badnaa oo u war dheereeyay yay ahaayeen. Dabadeed haddana waa fakareen, raggii farsamayaqaanada ahaa ee soomaaliyeed ee tumaaladda loo yiqiin, waxay keeneen mid geed ay ku daabaan oo ul dheer lahoo usha intay kala jeexaan haddana suun kor ka waxeeyeenoo dheer dadka hadduu saas aad u qabsado ninku siiban hayo oo seef camal ah bey keeneen, oo waa seef baa loo yaqaan, ulna waa tahay, waxay keeneen haddana tu aan seefti banaanka ka immanaysay, taasi waa ka bir adagtahay, waana ka aslisantahay, ee waana wax wershadi samaysay taasi, waxaa jirta mid kale oo nooceedii u eg oo kana geddisan ayey keeneen oo haddana ay sameeyeen. Marka waxaa jiray mindi ayaduna banaanka noogu timaaddo, haddii la doonana toorrey ah oo carabi la yiraahdo, oo yar oo inta lagu xirto, waa arkeen raggaan soomaalida ah, farsamayaqaanka ah; ayadii oo tabtii oo kale ah yey soo saareen iyadana waa sameeyeen, oo iyadana waa jidhaa.

Marka waxayaabaha nimankani ay birta ka gaareen anigu waxaan leeyahay markii hore oo soomaalidu haddan iyaga ku jirin waxbaba xalaal ma aha, saa bir lama arag, wax lagu cuno lama arag, anigu waxaan leeyahay nimankaasu waa niman cajaa’ib leh yaan leeyahay. Marka nimankaani birta heerarkii ay ka gaareen iyo sida ay wax u suubiyaan waa niman mahad celin weyn u bahaan yaa leeyahay.

Marka bal anigu intaan yar baan idin ku kordhiyay ee Caliyow

waan kugu soo celinayaaye bal iga hoo, Dhegaweyne iyo raggii gacantey taagayaane.

Cali Mudiir — Maanta mowduuceena aad baa looga sheekeeyey. Macaadinta birta laga dhalaaliyo qalabka noocyadiisa kala duwan lagu sameeyo ayaan weli ku jirnaa, macaadinta, qalin shubka, qalinka birta lagu shubo noocyadiisa, horta hore miniraalka la yiraahdo, macdan baa la yiraahdaa, macdankaas laba magac baad u bixiseenoo waxaad tiraahdeen bir lab iyo bir xaar. Maar baa jirta, lacag baa jirta, waxaasoo dhan waxaa laga sameeyaa qalab, haddaba waa inaad xasuusato Sheekh Abuu qalin-shubkii baa kuu soo socda, maartii baa kuu soo socota, waxyaalka laga samaystaa kuu soo socota, waxaasoo dhanna tumaalaha iyo qalin shubka iyo tumaalka ayaa noo sameeyaa, waxaa jirta mindii la yiraahdo “Qoodo” baa jirta kolba anigu waan aqaan. Qawley ayaa jirta, qalabyadaas oo dhan ayaa jira, qalabka mallayga lagu qaato dhowr nooc baad ka sheegteen oo makaalin iyo qabato iyo lacaaf iyo jilaab iyo kulli waad sheegteen; bal hadda adoo xusuusanaysid qalin-shubka iyo qalabkaas, Sheekh Abuuwow macaadinta noocyadeeda bal hadda ku noqo, oo xasuuso maanta.

Sheekh Abuu — Caliyow waad mahadsantahay. Anoo hadda mar labaad ku soo noqday, horta waa jirtaa qalabka dadkaan tumaasha oo farsamayaqaanka, haddii anaga dadkaas qabi lahayn soomaali khatar baa ku jiri lahayd. Maxaa jira wixii la isku gudo oo dhan oo islaannimada kow yacni laysku gudo, oo la iska sunneeyo, waa birta, weligeeyna soomaali ahaan islaan ahaan waxaan isku gudi jirnay waa birtaasay. Annagaa samaysan jirnay, mindidaan la isku, waayo islaannimmadii yaan ku soconnaa oo aan nahay, birtaas la isku gudo banaanka manooga iman jirin annagaa samaysan jirnay, kow. Xoolihii wixii lagu qalayey, maxaa lagu qalaa waa birta annaga aan samaysano, midda lagu dagaalamo annagaa samaysan jirnay. Marka haddaan u soo noqdo maarta iyo macdanta, Caliyow maarta meel kasta waa ku jirtaa, yacni waxaa la isku dhahaa; bir-xaartii, marka la sameeyo birta asliga ah, bir ama quruxda xaggeed lagu shoobo ha noqoto, bilaawahaa laguu sheegayo ee ulaha shoobka loo qaato, seefaha shoobka loo qaato, waxaa weeye bir xaarta iyo maarta ayaa ku socota, haddii lagu dhahana quruxda ma soo baxayso waa la isku dhex labaa; maartii iyo macdantaan bir xaarta. Marka faraantiga, maarta iyo bir xaarta qalin shubkaa sameeyaan, qalinka gabdhahaynaa ku shoobaan, dhowr cayn bey u kala baxaa, haddii aan wax ka taabto tan naagaha ku shoobaan oo qalinkii matalan, waxaa laga bilaabaayaa shoobka naagaha kan ay luqunta ku xirtaan “Xirsiilow” waa qalin “Luqun-dhuuf” waa qalin, “Dhaas” waa qalin, “Gabbal” waa qalin, “Dhaas-lama-saroodle” waa qalin, ayaa laga sameeyaa. Marka jinjimaha ay naagaha ku shoobaan farsamoyaqaankeena samaynaayo waa jinjimo gabdhaha yaryar iyo gabdha waaweynba waa la cabiraa, waxaa lagu cabiraa aan arki jiray waa mayrax, mise maydho, ninba siduu u yaqaano, Iyaka saasaa lagu soo saaraa qalinka, qalinkii baa lagu tumaa yacni. Batayna waa jiraa oo qasdi yaa loo samaystaa, qalinkaa laga

shubtaa oo naagaha ay ku shoobaayaan. Luqunta ama dhegaha qalin baa la gashtaa, mise batay baa la gashtaa, farsamo yaqaan baa sameeyaan.

Faraanti, raggii odayaasha ahaa, waxaa loo sameeyaa faraati qalin oo xarrago oo uu ku shoobo, ama gabdhahaas hadda yaryar, ama wiilasha yar yar, maar ayaa loo samaystaa, xijaabna waa la samaystaa. Maarta waxaa loo samaynaa ilmihii hadda la dhalay oo yar yarka aahay, waxaa la yiraa ishay xijaab, lugtaa loo gelinaa, wiil ha ahaado amase gabar ha ahaato, maartaasaa lugta loo gelinaa, waa xijaab, faraanti maartana waa xijaab, ee waxaa loo gooyay mise waxaa loo xiray qardhaas, xirsiyaa loo sameeyay; xirsigaas waxaa la gelinaa maar, dadka weyn ha ahaado ama ha yaraado xijaab waaye, ragga barkiis ma xirtee waxaa lagu sameynaa kiishka suunkaa lagu xirtaa, “Kaloon” baa la yiraahdaa..

Dadkaan farsamo yaqaanka oo qalinka aad iyo aad u sameeya, “Rujul”, carab nooga timid baa jirtay oo ah bir lugaha la geliyo oo lagu shoobo, carabtii markay ka timid waan qaadanay, wax kukuusan tii dhegaha kukuusan aa la gelinaa markaasaa gabarta haddii halkan soo marayso waxay leedahay shalow, shalow! Sidii koortii camal waa yeeraysaa, marka gabadhaas inta marayso waa ina hebla, maxaa ugu jiro, biraha qalin oo rujul ah, waxaa oo la geliyay oo yeeraaya waxaa la yiraahdaa “Shuwaar”.

“Sanuub” waxaa la yiraahdaa midka kale ay naagaha ku shoobaan oo qalin ama maar ah, waxaa la yiraahdaa jijinta waaweyn oo dhudhunka lagu shubo, xarraga waa la yiraahdaa. Ulaha raggaa ku shoobo qaarkooda bataygaasaa aad looga xarakoodaa. Bilaawaha maar ayaa la geliyaa dhulka meesha la dhigo, dhexdhexaadka waxaa la gelinaa batay haddana meesha oo gacanta u soo dhow maar baa la gelinaa, ugu danbeystii meesha gacanta lagu qabsanaayo waxaa la gelinaayaa haddana bataygii cadday, marka waxaa kale ay farsamo yaqaanka birtumayaasha sameeyaan aan haddayey warmaha kuwo la jiray oo aan ka iloobay waxaana la yiraahaa “Jelsi” waa mid shooble loo qaato, hoos sidii warankana ma aha, waa gaabantahay laba dhudhun camal waaye, sidii usha bakooraddaa loo qaato, hoos waxaa ku jirtaa bir adag, dhexdaan waxaa laga gelinaa batay, dhexdhexaadkana maaraa lagu samaynaa, gacanta meeshii lagu qabsahaayo qalinaa lagu samaynaa, waxaa loo samaystaa xarako shoob, waxaa la yiraahdaa “Jelsi”. Waa la isku dhex labaa; marka waranka haddaayey aan idiin soo sheegay waran baa jiraa, kulligiis bir ah, waxaa la yiraahdaa “*Waran-Cadow*” waran oo yacni aad waxaa la diidaa waa soo jabaa kulligiis waa bir shub ah, aniga hadda al’aana gurigayna waa yallaa, farsamo yaqaankaa noo sameeyaan, kulligiis waa wada bir.

Farsamoyaqaanka ama tumaasha haddii ay ahaan lahayn soomaalida islaannimadeeda khatar baan ku jiri lahayn. Waxaas isticmaalkooda muddo dheer baan haysannaa, oo qofba nookeenin. Hadda heer waxaa la gaaray farsamoyaqaankeenii oo ama qalinshubaheenii, birshubaheeni, dadkaan birta tuma waxay heer gaareen inay wixiiba dibadda nooga iman jiray joojiyaan, annagoo markii hore boqolkiiba sagaashan aan samaysan jirnay,

tobankii naga dhimanayd ee dibadda nooga iman jiray aa la joojiyay hadda. Waxaa ka mid ah badiil baa banaanka nooga iman jiray annagaa samaysanno, waxaa banaanka nooga iman jiray geedkaan gerweyn, hadda annagaa samaysano. Hadda miisaanaa la gaaray, miisaankii u darnaay ayaan hadda samaysannaa oo birtumayaashaynii noo sameeyaan, waxaa la gaaray dadka noo fududeeya, xataa geedkaan oo geed dhagaal “Ordhaqaal”, ordhaqaalkii oo shooki lagu qori jiray oo la samayn jiray waa laga soo baxay oo baaf aa la samayn jiray, baafkii ee farsamoyaqaan baa hadda sameeya oo dharka marada lagu dhaqo geedkiina hadda baadiyo xagga uu ku dambeeyaa, geed ordhaqaal, laakiin badi ahaan waxaa hadda la sameeyaa baaf oo farsamo yaqaanku soo saaray. oo maro lagu dhaqdo sheygaan oo iyaga sameeyaan waxaa la yiraahdaa kabaabihii oo geed noo ahaan jiray waxaa lagu bedelay bir, “Kabaabe” oo wax lagu kabaabeeyo baa lagu daray oo farsamo yaqaanka iyagaa sameeyaan kabaabe.

Waxaan hadda boqolkiiba sagaashan ayaan samaysan jirnay 10-kii naga dhimanna waa la dhamaystiray oo waa la buuxiyay. Seeftii markii hore waa tii Salaad aad tiri banaankey ka iman jirtay, waxaa loo kala qaadaa (Carab & Xabashi) annagana waan samaysan jirnay. Laakiin shubay ahaayeen kuwaas, kuwaaynina waa seef la tumo, tan waxaa looga cabsanaayey culayska, waa kakan tan la tumo, weligeyna annaka waxaan soo aragnay anigoo cimrigaas joogo lixdamaad baan ku jiraaye iyo ka hor annagaa samaysan jirnay mindidaas wax lagu gudo iyo tan wax lagu qalaba annakaa samaysan jirni, middi xiir waa la yiraahdaa, waa midda aan kuu sheegaayo oo seynigaas lagu afeeyo, mindidaas oo lagu xiirto iyo tna wax lagu gudo waxaas oo dhan aan soo marnay waa samaysan jirnay weligeen.